



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WADAJIR DISTRICT COURT
MOGADISHU-SOMALIA

SUMMAD:MDWAD/193/2022

TR. 09/02/2022

UJEEDO:- SUGITAAN DHAXALKOOB, CADEYN TARIKO, QAYIM, IYO WAKAALADO.

Maanta oo ay taariikhdu tahay **09/02/2022**, Waxaa maxkamadda Degmada Wadajir Hor Yimid Markhaatiyaasha kala ah:-

- 1-) **Shire Maxamed Kulmiye**, Somali ah, Ku Dhashay Muqdisho, Sanadkii 1982, Hooy: Aamino Ibraahim Rooble, Lehna Somali Passport No. P00563358.
- 2-) **Cabdi Cali C/laahi**, Somali ah, Ku Dhashay Isiolo - Kenya, Sanadkii 1986, Ina Seynab Cilmi Jimcaale, Lehna Kenyan Passport No. CK00545.

Waxayna si Wadajir ah Maxkamadda Horteeda uga Caddeeyeen in uu Geeriyooday Marxuum **YUUSUF XAAJI MAXAMUUD ROOBLE**, kuna Geeriyooday London - UK, Sanadkii 2020, Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in Marxuumka Aabihiis iyo Hooyadiis ay ka geeri horeeyeen, xaasna uusan qabin, sidoo kalana awlaadna kama uusan tagin, uuna ifka uga tagay oo dhaxlaya walaalihiis ku hooyo iyo ku aabo ah, waxayna kala yihiin, **4- Wiil** , iyo **2- Gabdhood**, Waxayna kala yihiin sidan soo socota:-

DADKA:-

| | | | | | |
|--------------------|-----------------|---------------|-------------|----------------|-----------------------------|
| 1-Bashiir | Maxamuud | Rooble | Degan Xamar | Dhashay 1990 | (Walaalka Marxuumka) |
| 2-Garaad | Maxamuud | Rooble | Degan Xamar | Dhashay 19-- | (Walaalka Marxuumka) |
| 3-Axmed | Maxamuud | Rooble | Degan UK | Dhashay 1986 | (Walaalka Marxuumka) |
| 4-Nuuradiin | Maxamuud | Rooble | | Marxuum | (Walaalka Marxuumka) |
| 5-Najuum | Maxamuud | Rooble | Degan UK | Dhalatay 1982 | (Walashii Marxuumka) |
| 6-Naciimo | Maxamuud | Rooble | Degan UK | Dhalatay 1980 | (Walashii Marxuumka) |

Intaas Kadib Waxay Markhaatiyaashu caddeeyeen in uu Geeriyooday **Marxuum Nuuradiin Maxamuud Rooble**, uuna ku geeriyooday Muqdisho, Sanadkii 2021, labadiisa waalidna waa ay ka geeri horeeyeen, Xaasna ma uusan qabin, Wuxuuna Ifka uga Tagay oo Dhaxlaya Dhaxaltooyo Ka Kooban **3-Wiil**, iyo **1- Gabar**, waxayna kala yihiin.

| | | | | | |
|------------|-----------|----------|----------|--------------|----------------------|
| 1-Zakariye | Nuuradiin | Maxamuud | Degan UK | Dhashay 2006 | (Wiilkii Marxuumka) |
| 2-Salmaan | Nuuradiin | Maxamuud | Degan UK | Qayim 2008 | (Wiilkii Marxuumka) |
| 3-Sumaya | Nuuradiin | Maxamuud | Degan UK | Qayim 2012 | (Gabadhii Marxuumka) |
| 4-C/risaaq | Maxamuud | Maxamuud | Degan UK | Qayim 2016 | (Wiilkii Marxuumka) |

Waxay kaloo Markhaatiyaashu Caddeeyeen in aysan jirin Cid kale oo Marxuumka dhaxleysa oo Nool ama Geeriyootay, haday noqon lahaayeen Asal Ama Farac.



=MASAWIRADA MARKHAATIYAASHA=

SHIRE MAXAMED KULMIYE



CABDI CALI C/LAAHI



=MASAWIRKA DHAXALTOOYADA XAMAR KU SUGAN=

GARAAD MAXAMUUD ROOBLE



=MASAWIRKA WAKIILKA DHAXALTOOYADA=

BASHIIR MAXAMUUD ROOBLE



HANTIDA LAGA DHAXLAAYO MARXMUUMKA.

Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in **MARXUUM YUUSUF XAAJI MAXAMUUD ROOBLE**, uu ifka uga tagay Guri Dhisan oo ku yaal Xamar Degmada (**HODAN**), Cabirkiisuna yahay (**12x12**)-M, Lotto No. **Nagazaain**, Lehna Sabarlog No. 11/48/2021, & Rasiid No. 11298, kuna wada taariikheysan 3/8/2021, kana soo baxay Dowlada Hoose ee Muqdisho, Ahna Duplicate.

WAKAALADO

Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa in **1-Naciima Maxamuud Rooble**, **2-Najuum Maxamuud Rooble**, **3-Axmed-Rashiid Maxamuud Rooble**, **4-Zakariye Nuuradiin Maxamuud**, oo Ka Tirsan Dhaxaltooyada in ay soo wakiisheen **Bashiir Maxamuud Rooble**, sida ku cad **A-Warqad wakaalad Gaar ah**, No. DIW/AA/211013/21, Tr. 09/10/2021, **B-Warqad wakaalad Gaar ah**, No. DIW/AA/211003/21, Tr. 01/10/2021, sido kale ninka lagu magacaabo **Garaad Maxamuud Rooble**, wuxuu maxkamadda horteeda ku wakiishay walalkiis **Bashiir Garaad Maxamuud**, una soo wada wakiisheen in ay u maamuli Karo, dhaxalkoob u samayn Karo, u Qeybin karo, xafidi Karo, Gadi Karo, Hibeyn Karo, Wareejin Karo, Qofkasta Qismigiisa Ku Wareejin Karo, dhisi Karo, kireyn Karo, ka saari Karo, saxiixi Karo kaalintooda, una doodi Karo una dacwoon Karo oo qareen u qaban Karo, Maxkamadaha dalka hortooda u matali Karo qismiga ay ku leeyihiin hantida dhaxalka ah, ay ka dhaxlayaan **MARXUUM YUUSUF XAAJI MAXAMUUD ROOBLE**.

QAYIM.

Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugeysaa in ilmaha aan qaan gaarin ee uu Ka tagay oo kala ah **1-Salemaan Nuuradiin Maxamuud**, **2- Sumaya Nuuradiin Maxamuud**, **3- C/risaaq Nuuradiin Maxamuud**, uu Qayim u yahay Adeerkood **Bashiir Maxamuud Rooble**, Wuxuuna u taaganyahay Qayb dhaxleedka ay Ka Heleen Dhaxalka Aabahood, in Qaybtooda uu u gadi Karo, Hibeyn Karo, Wareejin Karo, u Qaadi Karo Qismigooda.



DAMIINU MAAL

- **Shire Maxamed Kulmiye & Cabdi Cali C/llaahi**, Waxay Maxkamadda Ka Hor Cadeeyeen in ay Damiinul Maal Buuxa ka Yihiin, Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Sare Ku Xusan Hadii ay Dhacdo in ay Qariyaan Qof Ka Mid ah Dhaxaltooyada ama ay noqon waayaan dadka sare ku xusan Kuwii Dhabta ahaa, Masuul Buuxana ay Ka Yihiin Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada & Wakaaladaha Sare Ku Xusan Soo diray.

=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=

1- SHIRE MAXAMED KULMIYE



2- CABDI CALI C/LLAHI



= SAXIIXA DHAXALTOOYADA KU SUGAN MUQDISHO= GARAAD MAXAMUUD ROOBLE



=SAXIIXA WAKIILKA DHAXALTOOYADA KANA MIDNA AH DHAXALTOOYADA= BASHIIR MAXAMUUD ROOBLE



SUGITAANKA MAXKAMADDA

Maxkamadda Markay aragtay Codsiga dhaxaltooyadda, Markay dhageysatay marag furka Markhaatiyaasha, Markay aragtay dukumintiga Guriga oo uu marxuumka ku qoran yahay, Markay aragtay Wakaaladaha sare ku xusan, Waxay Maxkamada Degmadda Wadajir sugeysaa geerida Marxuumiinta kala ah **MARXUUM YUUSUF XAAJI MAXAMUUD ROOBLE**, IYO **MARXUUM NUURADIIN YUUSUF MAXAMUUD**, oo ay dhaxalkooda leeyihiin dadka sare ku xusan oo kaliya, waxay kaloo Maxkamaddu sugeysaa in dhmaan dhaxaltooyada ay soo wada wakiisheen **BASHIIR MAXAMUUD ROOBLE**, uuna Wakiil buuxa u yahay Dhamaan dhaxaltooyada, isla markaana ay awood buuxda u leeyahay ku tasarfka Hantida ay ka dhaxaleen Marxuumiinta sare ku xusan, sidoo kale waxay maxkamadda sugeysaa in caruurta aan qaangaarin oo kala ah 1-Salemaan Nuuradiin Maxamuud, 2-Sumaya Nuuradiin Maxamuud, 3- C/risaaq Nuuradiin Maxamuud, uu qayim u yahay adeerkood **Bashiir Maxamuud Rooble**, Waana Sugitaan dhaxalkoob, Qayim, iyo Wakaalado ansax ah waafaqsan Sharciga Islaamka iyo qaanuunka dalka, Waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee mucaamilaadka.

KAALIYAHA MAXKAMADDA

C/risaaq Cali Cabdi (Caabi)



GARSOORAHA MAXKAMADDA DEGMADA WADAJIR

Dr. Axmed Maxamed Cali

